

Wargelin iskuulku u dirayo guryaha

Gooryaan dirxiyeed (Kihomadot)

Waxa keena iyo siday dadka u qaadaan

- Waxaa keena gooryan cad oo madaxa u dhuuban oo dhererkiisu yahay 8-13 mm, ballaciisuna yahay hal millimitir oo wax dhiman (*Enteru Vermicularis*), oo ku noolaada malawedka (mindhicirka weyn). Gooryaankani dadka oo keliya ayuu ku dhacaa (galaa), dadkuna toos bay isu qaadsiiyaan.
- Sida loo qaadaa waa gooryaanka ukumihiisa ayaa qofka afkiisa gala. Gooryaanka kuwiisa dheddigga ah baa intay gaar ahaan habeenkii malawedka ka soo gurguurtaan bay ukumo ku dhalaan agagaarka futada daloolkeeda.
- Ukumuhu dharka sariirta ku goglan oo kale todobaadyo ayey ku noolaadaan.
- Gooryaanku markuu qofka galo iyo wakhtiga uu qofku astaamaha dareemo waxaa u dhaxayn kara 1-2 bilood.
- Gooryaan dirxiyeedku wuxuu inta badan ku dhashaa carruurta da'doodu u dhaxayso 3-10 sano, laakiin dhif ma aha, inuu carruurta waaweyn iyo dadka qaangaarka ah ku dhasho.

Astaamaha la isku arko

- Cuncun agagaarka futada daloolkeeda ah, gaar ahaan habeenkii, taas oo keeni karta inuu qofku habeenkii hurdada ka soo kac kaco iyo inuu isku kaajo.
- Xoqitaanku wuxuu keeni karaa in dabada jirkeedu yeesho infakshan bakteeriyo keento.
- Cunto xumo (abitayd xumo) iyo xanaaq badan.

Daaweyn

- Kaniin la yiraahdo Pyrvin oo farmashiyaha laga helo oo riijeeto la'aan ah baa daryeel hal mar ahaan ah loo isticimaalaa.
- Cidiyaha daryeelkooda waa in lagu dadaalaa, waana inay ahaadaan kuwo gaagaaban.
- Meel walba oo guriga ah waa in la nadiifiyaa.
- Gogosha sariirta waa in la dhaqaa ama wax kale lagu sameeyaa, tusaale ahaan qabowga berefka ah baa loo saaraa, si gooryaanka ukumihiisu u dhintaan. Go'yaasha sariirta ku goglan waa in kuwo kale lagu bedelaa.
- Kuurada daawada ah marka la isticimaalo waa in haddana 2 todobaad ka dib mar labaad la isticimaalaa.
- Waxaa fiican in la daaweeyo xitaa dadka qoyska ka tirsan ee aan isku arag astaamaha ah inuu gooryaanku ku dhashay.